

Qoyska Humboldt High School,

Xanuunka Koroona-fayraska (COVID-19) wuxuu saameyn weyn ku yeeshay ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha iskoolka ee Saint Paul iyo dalka oo dhan. Misana waxaa jiro hal koox oo aynu ka wada fekerayno: **waa ardaydeenna fasalka 12-aad ee Fasalka Qalin-jebinayo 2020 (Class of 2020).**

Ardaydan waxay filanayeen xaflado waaweyn iyo caadooyinkii dhici jiray xilliga gu'ga sida xafladda Prom-ka, bandhig muusig, ciyaaro isboortis, dalxiisyo, iyo—dabcan—qalin-jebin.

Waynu dareensannahay xafladahaan iyo munaasabadahaan qaarkood waxay reebaan xasuus raagto abid, haatanse uma muuqdaan kuwo dhici doono.

Degmada SPPS waxay dareensan tahay, lana wadaageysaa dareenkaas niyad-jabka ah, ardaydeenna qalin-jebinayso iyo qoysaskoodaba. Waa qalbi-jab.

Waxaynu rabnaa in ardaydeenna qalin-jebinayso ay ogaadaan inaynu garab taagannahay. Waynu aragnaa xaaladda ay ku jiraan. Inkastoo sannadkan ay qalin-jebin lahaayeen uu ka duwan yahay sidii la maleynayay, misana weli waa arday oo sannad-dugsiyeedka ma dhammaan – oo haatan weli waxaa lagu jiraa wakhti lagu dabbaal-degi karo guushooda tacliineed!

Degmada SPPS waxay ku hawllan tahay soo ururinta ra'yiga ardayda iyo qoysaska, iyo weliba qorsheynta qaabka uu yeelan karo qalin-jebinta Fasalka Qalin-jebinayo 2020. Waxaynu ku dedaalaynaa inaynu helno xal hal-abuur ku saleysan si loo maamuuso guusha ardaydan qaaska ah.

Toddobaadyada soo socdo waxaynu idinla wadaagi doonnaa xog dheeraad ah oo quseyso qorshaha lagu maamuusayo Fasalka Qalin-jebinayo 2020. Fadlan ka warqab email-kaaga, bogga internetka iskoolkaaga, iyo spps.org oo kala soco wixii soo cusboonaada ee quseeyo qalin-jebinta.

Waad ku mahadsan tahay sida aad u garab taagan tahay cunuggaaga iyo Humboldt High School.

Qaddarin badan,

Principal, Michael Sodomka
Humboldt High School